



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7 ^{aad}	Kulanka: 5 ^{aad}
Taariikhda: 10/25/2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:33 AM	Saacadda uu Xirmay: 1:58 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku xigeenka 1 ^{aad} ee Golaha Aqalka Sare. Sen Cali Shacbaan Ibraahim.	Guntanka Kulanka: 34 Senator
Martida Kulanka: Wax marti ah ma jirin	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 2 ^{aad} ee Hindise Sharciyeedka Barakacayaaasha Gudaha. 4. Sii wadista ka doodista Warbixinta Ku Saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare Arrimaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka iyo Aqalka Sare.

Furitaanka Kulanka:

Senator Senator Cabdirisaaq maxamed cusman ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka 1^{aad} ee Golaha Aqalka Sare Sen Cali Shacbaan Ibraahim ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 33 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka 1^{aad} ee Golaha Aqalka Sare Sen Cali Shacbaan Ibraahim ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha, Dib u heshiisiinta, Arrimaha Federaalka iyo Xiriirka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka Senator Deeqa Xasan Xuseen si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta akhrinta labaad ee Hindise Sharciyeedka Barakacyaasha Gudaha. Warbixinta kaddib, 14 Senator ayaa ka dooday akhrinta labaad ee Hindise Sharciyeedka, iyadoo 10 senator kale ay dood ka yesheen Warbixin Ku Saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare Arrimaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka iyo Aqalka Sare.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka
2. Guddoomiye ku xigeenka 1^{aad} ee Golaha Aqalka Sare Sen Cali Shacbaan Ibraahim ayaa faray Guddiga Arrimaha Gudaha Dib u heshiisiinta Arrimaha Federaalka inay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.
3. Guddoomiye ku xigeenka 1^{aad} ee Golaha Aqalka Sare Sen Cali Shacbaan Ibraahim ayaa sheegay in talooyinka ay soo jeediyeen Senatarrada loo beddeli doono qaraar rasmi ah oo Goluhu meel marin doono, si kor loogu qaado kaalinta metelaad Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Ugu dambayntii, Guddoomiye ku xigeenka 1^{aad} ee Golaha Aqalka Sare Sen Cali Shacbaan Ibraahim ayaa kulanka soo xiray sacadu markay ahayd **1:58 PM**.

DHAMAAD